When your child needs a hospital, everything matters.℠

**KOONTADA BUKAANKA – BIILKA ISBITAALKA**
**Xeerarka iyo Habraacyada**

| | |
|---|---|
| Ciwaanka Xeerka: **KAALMADAKAALMADA DHAQAALAHA** | Taariikhda Dhaqangalka 01/01/2016 |
| Qeybta: Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka | Taariikhda Dib loo eegay: 4/17/2017, 12/4/2017, 3/7/2019, 10/15/2019, 11/19/2019, 1/1/2021, 1/1/2022, 1/1/2023, 10/12/2023, 1/1/2024, 1/1/2025 |

**UJEEDADA IYO BAAXADA:**

Ujeedada xeerkan waa abuurista habraacyada caadiga ah ee go'aaminta kaalmada maaliyada ee bukaanada Nationalwide Children's Hospital (Nationwide Children's) iyo Hay' adaheeda Xulafada ah ee u baahan dhaqaale. Xeerkan wuxuu u dajiyaa nidaam shaqaalaha Waaxda Koontooyinka Bukaanka, shaqaalaha kale ee isbitaalka, iyo wakiillada Ibiyayaasha Dibadda si loo aqoonsado bukaannadaas iyo qoysaska u qalma daryeel lacag la'aan ah ama qiimo dhimis leh. Waaxda Xisaabaadka Bukaanka Nationwide Children's ayaa leh awoodda ugu dambeyso ee lagu go'aamiyo haddii shaqsi uu u qalmo kaalmo dhaqaale iyo lagu go'aaminayo tallaabadaas macquulka ah waxaa la qaaday ka hor intaysan ka qeybgelin Nationwide Children's oo Talaabooyinka Ururinta aan Caadiga aheyn. U qalmida kaalmada dhaqaalaha waxay quseysaa dhammaan bukaannada iyadoon laga eegin jinsiga, midibka, caqiidada, qowmiyada, asalka dhalashada, da'da, jinsiga, dooqa galmada, aqoonsiga jinsiga, diinta, ama naafonimada.

Adeegyada lagu daboolay xeerkaan waxaa ka mid ah dhammaan xaaladaha degdegga ah iyo Daryeelka kale ee Caafimaad ahaan Loogu baahan yahay ee ay bixiyaan Nationwide Children's iyo Hay'adaha Xulafada la ah.

Nationwide Children's waxay siin doonaan, iyadoon takoor laheyn, daryeelka xaaladaha caafimaad degdega ah shaqsiyaadka iyadoon laga eegin haddii ay u qalmaan kaalmo dhaqaale. Nationwide Children's ayaa u hogaansami doono Xeerka Daaweynta Caafimaadka Degdegga ah iyo Shaqada (Emergency Medical Treatment and Active Labor Act, EMTALA) iyagoo bixinayo baaritaanada sheybaarka caafimaadka iyo daaweynta xasilinta oo u gudbinayo shaqsiga xarun kale, markii ay ku haboontahay, oo siinayo adeegyada xaaladaha degdega sida waafaqsan 42 CFR 482.55 (ama qaanuun walba ee ku xigaha). Nationwide Children's ayaa mamnuucdo falal walba ee ka horjoogsanaya shaqsiyaadka inay raadsadaan daryeelka caafimaadka degdega, sida dalbashada in bukaanada waaxda xaalada degdega ay bixiyaan intaysan helin ka hor daaweynta xaaladaha caafimaadka degdega ama u ogolaanaya howlaha aruurinta deynta ee faragelisaa bixinta, iyadoon jirin takoorka, daryeelka caafimaadka degdega ah.

**QEEXITAANADA:**

<u>Hay'adaha Iskaashatada</u> – Shirkadaha Iskaashiga ee ay leeyihiin Nationwide Children's Hospital ee bixiyaa Daryeelka xaaladaha degdega iyo Caafimaad ahaan Loo baahanyahay ee isbitaalka oo ay ku jiraan Children's Anesthesia Associates, Children's Radiological Institute, Children's Surgical Associates, Pediatric Academic Association, iyo Pediatric Pathology Associates of Columbus. In kastoo Dhaqanada Children's Community aysan bixin daryeelka bukaanka ee isbitaalka, waxaa iska leh Nationwide Children's Hospital oo waxay ku bixiyaan kaalmo dhaqaale sida waafaqsan xeerkaan.
<u>Lacagaha guud ahaan Loo diro (Amounts Generally Billed, AGB)</u> – Lacagaha guud ahaan ay u diraan Nationwide Children's bukaanada leh caymis.

Iibiyayaasha Dibada – Shirkadaha loo kireysto inay matalaan sida hay'adaha quseeeyo biilgareynta iyo aruurinta.

Tallaabooyinka Aruurinta Aan caadiga aheyn – Tallaabooyinka ay ka qaadaan Nationwide Children's shakhsiga ee la xiriiro helida lacag bixinta biilka daryeelka ku caymisan sida waafaqsan Xeerkaan Kaalmada Dhaqaalaha ee lagu dajiyay 26 CFR 1.501(r)-6(b) (ama qaanuun walba oo ku xiggaha ah).
Cabbirka Qoyska - Waxaa ka mid noqonayo bukaanka, xaaska bukaanka, iyadoon laga eegin haddii xaaska ku noolyahay guriga, iyo dhammaan carruurta bukaanka, ay dhaleen ama soo korsadeen, oo ka hooseeyo da'da sideed iyo toban ee ku nool guriga. Haddii bukaanka uu ka yaryahay da'da sideed iyo toban sanno, "qoyska" waxaa ka mid noqonayo bukaanka, waalidka(iinta) dhalay ama soo korsaday (iyadoon laga eegin haddii ay ku noolyihiin guriga), iyo carruurta waalidka(iinta), dhaleen ama soo korsadeen sida waafaqsan da'da sideed iyo toban sano jirka ee ku nool guriga.
FAP – Xeerka Kaalmada Dhaqaale.
Heerka Saboolnimada Dalwada dhexe (FPL) – cabirka ay qeexeen dowlada Mareykanka sida waafaqsan Dakhliga sannadlaha iyo cabirka qoyska si loo tilmaamo xaddiga saboolnimada.
Dalacaadyada Guud – Lacagaha loogu dalaco daryeelka caafimaadka.
Dakhliga Guud - Wadarta dakhliga ka hor intaan wax ka jarid ah la sameynin.
Dakhliga – Waxaa ka mid ah dhammaan illaha Dakhliga oo ay ku jiraan, laakiin kuma xadidno joornaatiyada guud, Dakhliga kirada, magdhowga shaqo la'aanta, faa'idooyinka amniga bulshada, iyo kaalmada dadweynaha.
Daryeelka Caafimaad ahaan Loo baahanyahay – Adeegyada daryeelka caafimaadka ama saadadka looga baahanyahay ka hortaga, ogaanshaha, ama daaweynta jirada, dhaawac, xaalad, cudurka, ama astaamahooda oo buuxiya heerarka la aqbalay ee daawada.
Masuuliyada Bukaanka – Lacagta uu shakhsiga masuulka ka yahay oo kadib dhammaan lacag bixinada caymiskoo dhan (oo ay ku jiraan lacag bixiyayaasha ganacsiga iyo dowlada), ka jarista, iyo dhimista ayaa lagu dabaqay biilka bukaanka.

**TILMAAMAHA:**

**Sharuuda U qalmida**

Bukaan walbo oo helayo ama raadinayo inuu helo xaalada degdega ama Daryeelka Kale ee Caafimaad ahaan Looga baahan yahay Nationwide Children's ayaa codsan karo kaalmada dhaqaale, si kastaba, shuruuda loo isticmaalo in lagu qiimeeyo u qalmida ayaa ka duwanaan karto sida ku saleysan meesha bukaanka daganyahay haddii uu bukaan raadinayo daryeelka xaalada degdega.

Dadka deegaanka ah ee Ohio ee codsanaaya kaalmada dhaqaale waxaa lagu dhiirogelinayaa, laakiin looma baahna, inay marka hore codsadaan kaalmada dowladda ee la heli karo oo ay ku jiraan, laakiin aan kuma xadidna, Ohio Medicaid (Healthy Start iyo Healthy Family), Barnaamijka Hubinta Daryeelka Isbitaalka Ohio (Ohio Hospital Care Assurance Program, HCAP), iyo Khamrida iyo Daroogada iyo kaalmada Gudiga Caafimaadka Dhimirka (Alcohol, Drug and Mental Health, ADAMH). Dadka deegaanka ah ee Ohio ee ka reeban Amniga Bulshada iyo canshuuraha Medicare waa inay bixiyaan foomka dhameystiran ee 4029 "Codsiga Ka dhaafitaanka Amniga Bulshada iyo Canshuuraha Medicare iyo Ka dhaafitaanka Faa'idooyinka" si markaas looga reebo sharuudaan. Bukaanada ah degayaasha Ohio laakiin aanan u qalmin inay ku helaan faa'idooyinka sida waafaqsan barnaamijyadaan iyo bukaanada aanan aheyn Dadka deegaanka ah ee Ohio ee ka helaa daryeelka caafimaadka xaalada degdega Nationwide Children's ayaa u qalmi karo kaalmada dhaqaalaha sida ku saleysan wadarta Dakhliga Guud iyo Cabirka Qoyska oo sida xigta:

- Dakhliga oo boqolkiiba 200% ama wax ka yar Heerka Saboolnimada Dalwada dhexe (FPL) waxaa lagu qorayaa boqolkiiba 100% Mas'uuliyadda Bukaanka.
- Dakhliga u dhexeeya 201% iyo 250% ee FPL waxaa lagu qorayaa 80% oo Mas'uuliyada Bukaanka.
- Dakhliga u dhexeeya 251% iyo 300% ee FPL waxaa lagu qorayaa 60% oo Mas'uuliyada Bukaanka.
- Dakhliga u dhexeeya 301% iyo 400% ee FPL waxaa lagu qorayaa 45% oo Mas'uuliyada Bukaanka.

Dadka deegaanka ah ee Ohio ee leh Dakhliga qoyska ee ka badan 200% ee FPL laakiin ka yar 450% ee FPL oo biilashooda Nationwide Children's ay ka badan yihiin 20% oo Dakhliga qoyska ee sannadlaha ah waxaa loo txigelinayaa in caafimaad ahaan u liitaan ujeedooyinka xeerkaan. Qoysaska caafimaad ahaanta liita waxay u qalmayaan dhism sareyso oo Masuuliyada Bukaanka oo cadadkaas ah oo Masuuliyada Bukaanka qoyska oo dhammaan biilasha Nationwide Children's oo u dhigma boqolkiiba (%) ee Dakhliga qoyska ee sannadlaha ah sida hoos lagu sheegay:

- Dakhliga oo boqolkiiba 200% ama wax ka yar Heerka Saboolnimada Dalwada dhexe (FPL) waxaa lagu qorayaa boqolkiiba 100% Mas'uuliyadda Bukaanka.
- Dakhliga u dhexeeya 201% iyo 250% ee FPL waxaa lagu qorayaa haraaga u dhigma 5% ee Dakhliga qoyska sannadlaha reerka.
- Dakhliga u dhexeeya 251% iyo 300% ee FPL waxaa lagu qorayaa haraaga u dhigma 7% ee Dakhliga qoyska sannadlaha ee reerka.
- Dakhliga u dhexeeya 301% iyo 450% ee FPL waxaa lagu qorayaa haraaga u dhigma 10% ee Dakhliga qoyska sannadlaha reerka.

Dadka deegaanka ah ee Ohio ee aan Mareykanka aheyn ee codsanayo kaalmada dhaqaale oo daryeelka caafimaadka aan xaaladaha degdega aheyn waa in xili hore loo ansixiyaa kaalmada dhaqaale ka hor intaysan helin daryeel noocaas ah oo aan xaaladaha degdega aheyn. Nidaamka ansixinta hore ayuu u baahanayaan shaqsiga si ay u soo gudbiyaan cudur daarka caafimaadka oo adeegyada ka dhacaya Nationalwide Children's iyo xarunta daryeelka caafimaadka ee gobolka deegaanka bukaanka. Cudur daarka noocaas ah waxaa dib u eegayo Nationwide Children's iyo bukaanada waxaa go'aamiyo Nationwide Children's si ay u yeeshaan cudur daarka caafimaadka ku haboon ee la gudbiyo ayaa u qalmi karo kaalmada dhaqaalaha si ku saleysan wadarta Dakhliga Guud iyo Cabirka Qoyska ee sida soo socda:

- Dakhliga oo boqolkiiba 200% ama wax ka yar Heerka Saboolnimada Dalwada dhexe (FPL) waxaa lagu qorayaa boqolkiiba 100% Mas'uuliyadda Bukaanka.
- Dakhliga u dhexeeya 201% iyo 250% ee FPL waxaa lagu qorayaa 80% oo Mas'uuliyada Bukaanka.
- Dakhliga u dhexeeya 251% iyo 300% ee FPL waxaa lagu qorayaa 60% oo Mas'uuliyada Bukaanka.
- Dakhliga u dhexeeya 301% iyo 400% ee FPL waxaa lagu qorayaa 45% oo Mas'uuliyada Bukaanka.

Dadka deegaanka ah ee aan Mareykanka aheyn ee codsanayo kaalmada dhaqaale ee daryeelka xaalada aan degdega aheyn waa in hore loogu ansixiyaa kaalmada dhaqaale ee lagu helayo daryeelka noocaas ah ee aan xaalada degdega aheyn sida waafaqsan Xeerka iyo Habraaca Nationwide Children's oo Bukaanada Samafalka Caalamiga ah. Gudiga Maareynta Nationwide Children's ee Bukaanada Caalamiga ah ayaa go'aamiyo u qalmida bukaanka caalamiga ah oo daryeelka samafalka ku saleysan markii dhowr sharuudo, oo ay ku jiraan waxqabadka caafimaadka loo baahanyahay, suurtogalnimada waxqabadka si guul ah u xalinayo xaaladaha caafimaadka hoos yaalo iyo in si ku haboon loo maareeyo waxqabadka kadib, haddii Nationwide Children's ay si gaar ah ugu suurtogaleyso inay bixiyaan waxqabad noocaas ah, helitaanka adeegyo noocaas ah ee gudaha wadanka bukaanka, xadeynada miisaaniyada, iyo sharuudo kaloo la mid ah sida Guddiga Maareynta laga yaabo inay go'aamiyaan ayaa ku haboon hubinta in illaha daryeelka samafalka Nationwide Children's ee dacwadaha caalamiga ah loo isticmaalo si aad ugu filan oo waxtar u leh. Warbixinta ku saabsan helitaanka daryeelka samafalka ee bukaanada caalamiga ah waxaa lagu heli karaa iyadoo lala xiriirayo Xarunta Soo dhaweynta Nationwide Children's.

Helayaasha Medicaid ee helaa Daryeelka Caafimaad ahaan Muhiimka ah ee aan ku daboolneyn Madicaid waxay yeelanayaan 100% oo Masuuliyada Bukaanka oo Daryeel walboo Caafimaad ahaan Loo baahanyahay ee sida toos ah loogu qoro. Codsiga kaalmada dhaqaale loogama baahanayo daruufahaan.

Qoysaska siiyaa Waaxda Koontooyinka Bukaanka Nationwide Children's Foomka Adeegyada Dakhliga Gudaha (Internal Revenue Service, IRS) 4029 ee dhameystiran ama dukumintiyada kale ee ay ku qancaan Nationwide Children's ee xaqiijiyo in qoyska oo ka dhaafay xaquuqdooda faa'idooyinka dowlada sababtoo ah ka mid ahaanshaha diinta qoyska ayaa u qalmayo qiimo dhismista Masuuliyada Bukaanka ee u dhiganto mida lagu siiyay sida waafaqsan FAP kaan kuwa leh Dakhliga u dhaxeeyo 301% iyo 400% ee FPL. Codsiga kaalmada dhaqaale loogama baahanayo daruufahan.

Iyada oon laga eegayn waxa kor ku xusan, adeegyada laga bixiyo goobta Nationwide Children's Hospital ee u adeego sida goobta Adeegyada Shaqaalaha Caafimaadka Qaran (National Health Services Corps, NHSC), taasoo lagu aqoonsado Lifaaqa 1 halkaan, u-qalmida kaalmada dhaqaale waxay ku saleysnaaneysaa kaliya cabirka qoyska iyo Dakhliga (iyadoon laga eegin xaalada deganaanshaha) oo waxaa lagu bixinayaa baaxada qimada ee lagu dajiyay Lifaaqa 1.

Qoysaska leh ciwaanka "Hoyga Guri la'aanta" waxay u qalmayaan qiimo dhimista 100% ee Masuuliyada Bukaanka. Codsiga kaalmada dhaqaale loogama baahanayo daruufahan.

Waaxda Xisaabaadka Bukaanka Nationwide Children’s waxay yeelanayaan mas’uuliyada ugu dambeyso oo go'aaminta u qalmida kaalmada dhaqaale sida waafaqsan xeerkaan.

**Aasaaska Xisaabinta Lacagaha lagu Dalaco Bukaanada**

Lacagaha lagu dalaco bukaanada u qalma kaalmada dhaqaale sida waafaqsan FAP gaan oo xaalada degdega iyo Daryeelka Caafimaadan ahaan Loo baahanyahay kama badnaanayo AGB. Nationwide Children’s ayaa xisaabiso AGB iyagoo isticmaalayo qaabka "Look-Back", sida lagu qeexay qaanuunadaan faderaalka, sida ku saleysan dhammaan sheegashooyinka ay ogolaadeen qidmada ee adeega Medicare iyo dhammaan caymiyayaasha caafimaadka gaarka ah oo ka badan muddo 12-bilood ah, waxaa lagu qeybiyaa Dalacaadyada Guud ee Nationwide Children’s oo sheegashooyinkaas ah. Nationwide Children’s ayaa cusbooneysiiso xisaabtooda AGB ee 1-da Janaayo sannad walba iyagoo isticmaalayo xogta ka imaaneyso muddada 12-ka bilood ee dhamaaneyso Sebteembar 30 isla markiiba ka horeyso 1 daas Janaayo. Sannadka kalendarka ee 2025, AGB waxay u dhigantaa 78.4%.

Shaqsiga u qalma kaalmada dhaqaalaha waxaa lagu dalacaa kaliya cadadka oo isaga ama iyada ay shaqsi ahaan masuulka ka yihiin bixintooda, kadib markii laga jaro dhammaan iyo dhimisyada (oo ay ku jiraan dhimista lagu heli karo sida waafaqsan FAP) ayaa lagu dabaqay iyo wax ka yar lacago walba ee ay magdhabeen caymiyayaasha (oo ay ku jiraan labada bixiyayaal ee gacansiga iyo dowlada).

**Qaabka lagu Codsado Kaalmada Dhaqaalaha**

Si loogu tixgeliyo kaalmada dhaqaale, shaqsiga waa inuu ka codsadaa kaalmada dhaqaale Waaxda Xisaabaadka Bukaanka Nationwide Children’s. Shaqsiyaadka raadinaya kaalmada dhaqaale sida waafaqsan Xeerkaan ee heerka dhimista 100% (tusaale ahaan shaqsiyaadka Dakhliga qoyskooda uu yahay 200% ama ka yar yahay ee FPL) waa inay buuxiyaan Arjiga Kaalmada Dhaqaale oo ay bixiyaan warbixin iyo dokumenti ku qoran Arjiga Kaalmada Dhaqaalaha. Saxiixyada elektarooniga ah ee arjiga waa la aqbali karaa. Dhammaan codsadayaasha kale waxay ku siinayaan warbixin muhiim ah Waaxda Xisaabaadka Bukaanka taleefon ahaan, arjiga warqada looma baahnaanayo. Nationwide Children’s ayaa leh xaquuqda lagu codsado koobiyada jeegaga lacag bixinta, W-2, iyo Dakhliga canshuur celinta.

Arjiga Kaalmada Dhaqaale (ha ahaato qoraal ama taleefon ahaan, sida kor lagu sheegay) waa in loo sameeyaa sida xigta:

- Adeegyada isbitaalka bukaan socodka ee bukaanada ah ama ka hooseeyo 100% ee FPL waxay ku caymisanyihiin HCAP iyo, sida, waxay u baahantahay arji cusub 90 maalmood ee walba laga bilaabo taariiqda hore ee adeega. Adeegyada isbitaalka bukaan socodka ee loogu tallogalay dhammaan bukaanada kale waxay u baahanyihiin arji cusub 180 maalmood ee walba laga bilaabo taariiqda bilowga adeega. Helayaasha barnaamijka Kaalmada Naafonimada (DA) ama barnaamijkooda ku xigga sida waafaqsan HCAP waa inay soo gudbiyaan arji cusub oo bil walba ku saleysan.
- Ogolaanshaha bukaan jiif walba, illaamaa bukaanka lagu seexiyo 45 maalmood gudahood ee ka bilaabaneyso uga saarida oo isla xaalada hoos taalo, waa inay ahaataa isla arjigooda kaalmada dhaqaalaha. Isbitaal seexinta xigta waxay noqon kartaa isla arjiga, laakiin kaliya haddii ay tahay 45 maalmood gudahood iyo xaalada la xiriirta. Xisaabaadka bukaanka socodka waxaa lagu dari karaa arjiga leh xisaabta bukaan jiifka, laakiin booqasho bukaan-jiifka laguma dari karo arjiga leh xisaabaadka bukaan socodka.

Nationwide Children’s ma isticmaalaan go'aanada u qalmida lagu go'aansanayo haddii shaqsi u qalmo kaalmo dhaqaale sida waafaqsan xeerkaan.

U qalmida Hor u dhaca ee Kaalmada Dhaqaale
Nationwide Children’s Hospital ayaa laga yaabaa inay isticmaalaan xisbi dadexaad ee u sameeyo dib u eegida warbixinta bukaanka si loo qiimeeyo u qalmida FAP ee kaalmada deeqsinimada lagu heli karo sida waafaqsan. Dib u eegidaan iyo falanqeynada waay isticmaalaan warshada daryeelka caafimaadka la aqoonsanyahay, qaab saadaalin ah. Dib u eegis noocaas ah looma isticmaalayo in lagu go'aamiyo u qalmida saadaasha ah ee wax ka yar kaalmada ugu deeqsinimada badan ee lagu heli karo sida waafaqsan FAP.

**Tallaabooyinka waxaa Lagu Qaadi Karaa Haddii ay Dhacdo Lacag bixin la'aan**

Nationwide Children’s waxay sameyneysaa isku day walba ee lagu aruuriyo deynta oo sameyso dadaalo macquul ah ee lagu go'aaminayo haddii shaqsiga u qalmo FAP ka hor inta uusan ka qeybgelin Tallaabooyinka Aruurinta Aan caadiga aheyn. Dadaalo noocaas oo macquul ah waxaa ka mid noqonayo dirista bayaano iyo taleefon wacitaan ku sameynta dhinaca masuulka ka ah ee jadwalka lagu dajiyay hoos inta lagu jiro 120 ka maalmood ee ugu horeysa ee ka saarida. Nationwide Children’s ayaa laga yaabaa inay isticmaalaan adeegyada libiyaha Dibada si loo caawiyo aruurinta qotoda dheer.

| | |
|---|---|
| 0 - 30 maalmood | Bayaanka biilka ugu horeeyo ee la diro, iyo ogeysiin qoran oo in kaalmada dhaqaalaha la heli karo, foomka arjiga FAP, iyo sida shaqsiga laga yaabo inuu ugu helo kaalmo nidaamka arjiga FAP. |
| 31 - 60 maalmood | Bayaanka labaad ee biilasha ee la diray, iyo dulmarka luuqad fudud oo FAP iyo ogeysiinta in Nationwide Children's ay damacsan yihiin inay u soo sheegaan xisaabta aan lacagta bixin xafiiska deynta haddii lacago noocaas ah aanan lagu bixin 365 maalmood gudahood laga bilaabo bayaanka ugu horeeyo ee biilka ka saarida kadib.<br>Intaas waxaa dheer, hal wicitaan oo taleefan ah ayaa loo sameeyaa si loogu ogeysiiyo shaqsiga hadal ahaan wax ku saabsan FAP ka Nationwide Children's iyo sida shaqsiga laga yaabo inuu u helo kaalmada nidaamka arjiga FAP. |
| 61 - 90 maalmood | Bayaanka sadexaad ee biilasha ee la diray, iyo dulmarka luuqad fudud oo FAP iyo ogeysiinta in Nationwide Children's ay damacsan yihiin inay u soo sheegaan xisaabta aan lacagta bixin xafiiska deynta haddii lacago noocaas ah aanan lagu bixin 365 maalmood gudahood laga bilaabo bayaanka ugu horeeyo ee biilka ka saarida kadib.<br>Intaas waxaa dheer, hal wicitaan oo taleefan ah ayaa loo sameeyaa si loogu ogeysiiyo shaqsiga hadal ahaan wax ku saabsan FAP ka Nationwide Children's iyo sida shaqsiga laga yaabo inuu u helo kaalmada nidaamka arjiga FAP. |
| 91 - 120 maalmood | Bayaanka afaraad ee biilasha ee la diray, iyo dulmarka luuqad fudud oo FAP iyo ogeysiinta in Nationwide Children's ay damacsan yihiin inay u soo sheegaan xisaabta aan lacagta bixin xafiiska deynta haddii lacago noocaas ah aanan lagu bixin 365 maalmood gudahood laga bilaabo bayaanka ugu horeeyo ee biilka ka saarida kadib.<br>Intaas waxaa dheer, labo wicitaan oo taleefan ah ayaa loo sameeyaa si loogu ogeysiiyo shaqsiga hadal ahaan wax ku saabsan FAP ka Nationwide Children's iyo sida shaqsiga laga yaabo inuu u helo kaalmada nidaamka arjiga FAP. |

Intaas waxaa dheer ogeysiinta qoraalka ah oo in kaalmada dhaqaalaha la heli karo, foomka arjiga FAP, iyo warbixinta ku saabsan sida shaqsiga laga yaabo inuu uga helo kaalmo nidaamka arjiga FAP, dhammaan bayaannada biilasha waxaa ku jirayo ciwaanka websayd toos ah meeshaasoo koobiyada FAP, foomka arjiga FAP, iyo dulmarka luuqad fudud ee FAP laga heli karo.

Nationwide Children's ayaa laga yaabaa inay u soo sheegaan xisaabaadka lacagta aan la bixin xafiiska deynta 1 sanno kadib ee ka bilaabaneyso taariiqda bayaanka biilka hore. Haddii biilasha shaqsiga la aruuriyo si loo daboolo qeybo badan oo daryeelka ah, xisaabta aan la bixin looma soo sheegayo xafiiska deynta illaa ugu yaraan 120 maalmood kadib ee bayaanka ugu horeeyo ee biilka ka saarida oo qeybta ugu dambeysay ee daryeelka ee lagu daray aruurinta.

Haddii shaqsi uu gudbiyo arjiga FAP ee aan dhameystirneyn inta lagu jiro muddada arjiga (tusaale ahaan 240 maalmood ee xigta bayaanka ugu horeeyo ee ka saarida kadib), Nationwide Children's ayaa siineyso shaqsiga ogeysiin qoraal ah ee qeexayo warbixinta dheeraadka ah iyo/ama dokumentiga looga baahanyahay sida waafaqsan FAP ama foomka arjiga FAP oo ah in loo gudbiyo si loo dhameystiro arjiga FAP sidoo kale sida warbixinta xiriirka ee waaxda Nationwide Children's ee bixin karto warbixin ku saabsan FAP iyo oo taasna waxay bixin kartaa kaalmo ku saabsan nidaamka arjiga. Nationwide Children's waxay joojineysaa Tallaabo walboo Aruurinta Aan caadiga aheyn (iyo, haddii ay quseyso, ogeysii libiyayaashooda Dibada inay joojiyaan dadaalo noocaas ah) illaamaa Nationwide Children's ay ka go'aamiso haddii shaqsiga u qalmo kaalmo dhaqaale sida waafaqsan FAP ama shaqsiga ku guuldareysto inuu ka jawaabo codsiyada warbixinta dheeraadka ah iyo/ama dokumentiga oo waqti muddo macquul ah gudahood.

Markii la helo arjiga FAP oo dhameystiran inta lagu jiro muddada arjiga, Nationwide Children's ayaa sameyneyso go'aaminta sida haddii shaqsiga uu yahay mid u qalma FAP ee daryeelka iyo ku ogeysiiyo shaqsiga qoraal ahaan ee go'aaminta u qalmidaan (oo ay ku jiraan, haddii ay quseyso, kaalmada oo shaqsiga u qalmo) iyo aasaaska go'aamintaan. Haddii shaqsiga loo go'aamiyo inuu u qalmo kaalmo aan ka aheyn daryeel lacag la'aan ah, Nationwide Children's waxay:

- Siineysaa shaqsiga bayaanka biilka ee tilmaamo cadadka shaqsiga leeyahay ee daryeelka sida shaqsiga u qalma FAP iyo sida cadadka loo go'aamiyay. Bayaanka biilasha noocaas ah ayaa sidoo kale qeexeyso sida shaqsiga u heli karo warbixin la xiriirto AGB oo daryeelka ah.
- U lacag celi shaqsiga cadad walba oo isaga ama iyada ay u bixiyeen daryeelka ka badan cadadka isaga ama iyada loo go'aamiyay inuu shaqsi ahaan masuul uga yahay bixinta sida shaqsiga u qalma FAP.
- Qaad dhammaan tallaabooyinka macquulka ah ee la heli karo si looga fogaado Tallaabooyin walboo Aruurinta Aan caadiga aheyn ee laga qaado shaqsiga si u helo lacag bixin noocaas ah.

Haddii shaqsi uu soo gudbiyo arjiga FAP iyo, ka hor inta aysan go'aamin Nationwide Children's haddii shaqsiga uu u qalmo FAP, shaqsiga wuxuu codsadaa u qalmida Medicaid, Nationwide Children's ayaa dib u dhigeyso go'aaminta haddii shaqsiga u qalmo FAP, oo kama qeybgalayo wax Tallaabooyinka Aruurinta Aan caadiga aheyn ee ka soo horjeedo shaqsiga, illaamaa kadib arjiga shaqsiga Medicaid la dhameystiro oo la gudbiyo iyo go'aaminta sida u qalmida shaqsiga ee Medicaid la sameeyo.

**Qor Bixiyayaasha Bixiyaa Xaaladaha Degdega ah iyo Daryeelka Kale ee Caafimaad ahaan Loo baahanyahay ee Nationwide Children's**

Liis sharaxayo bixiyayaasha gaarsiiya xaalada degdega ah iyo Daryeelka Caafimaad ahaan Loo baahanyahay ee Nationwide Children's iyo haddii adeegyadooda xirfadlaha uu ku caymisanyahay Nationwide Children's FAP waxaa laga fiirin karaa http://www.nationwidechildrens.org/financial-assistance, ama koobi warqad ah ayaa laga heli karaa iyadoo lala xiriirayo waaxyada hoos ku qoran sida waafaqsan Warbixinta Xiriirka.

**Helitaanka Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha, Dulmarka Luuqada Fudud ee Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha iyo Arjiga Kaalmada Dhaqaalaha**

Gelitaanka Websaydka
https://www.nationwidechildrens.org/your-visit/billing-and-insurance/financial-assistance
Koobiyada Warqada

- Oo loogu heli karo markuu codsado si lacag la'aan ah bukaanka iyo dhinaca masuulka ah.
- Koobiyada warqada waxaa lagu bixiyaa ka qaadashada seexin walba ama aagaga diiwaangelinta ee xarunta guud ee Nationwide Children's (oo ay ku jiraan Qolka Gurmadka) iyo meelaha ka baxsan goobta.
- Waraaqaha iyo Arjiyada Kaalmada Dhaqaalaha waxaa loo diraa bukaanada iyo/ama waaladiinta markay codsadaan.
- Dhammaan bayaanada biilasha waxay gadaasha bayaanka ku wataan Arjiga Kaalmada Dhaqaalaha sidoo kale sida warbixinta xiriirka ee waaxda ku bixin karto kaalmo arjiga.

Ogeysiinta iyo Warbixinta la Siiyay Bukaanada Xarunta Isbitaalka

- Saxiixa ku yaalo aaga seexinta ama diiwaangelin walba ee xarunta guud ee Nationwide Children's (oo ay ku jiraan Qolka Gurmadka) iyo goobaha ka baxsan si tallo loo siiyo bukaanada ama dhinaca masuulka ah helitaanka kaalmada dhaqaalaha.
- Wacitaanada taleefonka tooska ah ee bixinayo kaalmada dhaqaalaha ee la sameeyo kadib markii la soo saaro bayaanka biilasha labaad.
- La taliyayaasha Dhaqaalaah Nationwide Children's waxay ku booqdaan bukaanada u baahan kaalmada dhaqaalaha qolalkooda ama rugaha caafimaadka.

Ogeysiinta iyo la Socodsiinta Bulshada Balaaran

- FAP, Dulmarka Luuqada Fudud ee FAP iyo Arjiga Kaalmada Dhaqaalaha ayaa dhammaantood waxaa laga heli karaa www.NationwideChildrens.org.
- Nationwide Children's ayaa waxay sidoo kale si joogto ah ula wadaagaan Dulmarka Luuqada Fudud ee FAP iyo Arjiga Kaalmada Dhaqaalaha Xarumaha Caafimaadka Faderaal ahaanta U qalma ee ku yaalo Gobolka Franklin iyo sidoo kale dhaqaatiirta ku saleysan bulshada ee xubno ka ah shaqaalaha caafimaadka Nationwide Children's si markaas dokumentiyada loo diyaariyo bukaanada bixiyayaashaan.

Dukumintiyada la Turjumay

- Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha, Arjiga Kaalmada Dhaqaalaha, iyo Dulmarka Luuqada Fudud ee FAP waxaa lagu helayaa luuqada ay ku hadlaan koox walba ee leh aqoonta Ingiriiska xadidan (LEP) ee ka kooban wax ka yar 1,000 ama 5 boqolkiiba ee Gobolka Franklin ama kuwa kale oo sida macquulka ah ugu dhowdahay inay saameysay Nationwide Children's. Agaasimaha Xisaabaadka Bukaanka ayaa masuul ka noqonayo dib u eegida baahiyaha luuqada ee sannadle ku saleysan oo sameynayo noocyo turjuman ee dokumentiyada la heli karo sida loogu baahdo.

Warbixinta Xiriirka

| La taliyayaasha | Goobta | Taleefonka |
|---|---|---|
| **Nationwide Children's** La taliyayaasha Dhaqaalaha | Xafiiska Ogolaanayo 700 Children's Drive ama balan ahaan oo goobo walba ee Nationwide Children's | **(614) 722-2070** |
| **Nationwide Children's** Adeega Macmiilka | Xisaabaadka Bukaanka Wacitaanada Taleefonka Kaliya | **(614) 722-2055** |

**Waxaa ansixiyay Guddiga Miisaaniyadda, Maaliyadda iyo Hantidhowrka ee Agaasimayaasha Guddiga ee Nationwide Children's Hospital oo Nofeembar 26, 2024:**

________________________________________ ____________________

Nelson Weichold — Taariiqda

Sarkaalka Madaxa Dhaqaalaha

## Lifaaqa 1

Goobaha Nationwide Children's Hospital ee u adeego sida National Health Service Corps (Goobaha NHSC):

- Nationwide Children's Hospital – Hilltop Primary Care Center, ee ku yaalo 2857 W. Broad St., Columbus, OH 43204
- Nationwide Children's Hospital – Westside Primary Care Center, ee ku yaalo 441 Industrial Mile Rd., Columbus, OH 43228
- Nationwide Children's Community Dental, ID 8824118297, ee ku yaalo 2900 Inspire Dr, Columbus, OH 43224
- Downtown Primary Care-Nationwide Children's, ID 5049039152, ee ku yaalo 380 Butterfly Gardens Dr, Columbus, OH 43215
- Ft. Hayes School-Based Health Center, ID 4381469266, ee ku yaalo 468 Cleveland Avenue, Columbus, OH 43215
- Mt. Vernon School-Based Health Center, ID 6889084140, ee ku yaalo 300 Yellow Jacket Drive, Mt. Vernon, OH 43035
- Nationwide Children's Hospital Dental Clinic, ID 8508021858, ee ku yaalo 380 Butterfly Gardens Dr., Columbus, OH 43215
- West High School School-Based Health Center, ID 5140715017, ee ku yaalo 179 S. Powell Avenue, Columbus, OH 43204
- South High School School-Based Health Center, ID 4501922318, ee ku yaalo 1160 Ann St., Columbus, OH 43206
- Near East Primary Care, ID 9332228635, ee ku yaalo 1125 East Main Street, Columbus, OH 43205
- East High School School-Based Health Center, ID 4377185057, ee ku yaalo 1500 E. Broad St., Columbus, OH 43205

Qiimdo dhimista baaxada qidmada ee loo heli karo adeegyada laga bixiyo goobaha kore:

- Dakhliga oo boqolkiiba 200% ama wax ka yar Heerka Saboolnimada Dalwada dhexe (FPL) waxaa lagu qorayaa boqolkiiba 100% Mas'uuliyadda Bukaanka.
- Dakhliga u dhexeeya 201% iyo 250% ee FPL waxaa lagu qorayaa 80% oo Mas'uuliyada Bukaanka.
- Dakhliga u dhexeeya 251% iyo 300% ee FPL waxaa lagu qorayaa 60% oo Mas'uuliyada Bukaanka.
- Dakhliga u dhexeeya 301% iyo 400% ee FPL waxaa lagu qorayaa 45% oo Mas'uuliyada Bukaanka.